




Yoolasha Qorshaha Waxbarashada Gaar ahaaneed

(Individualized Education Program (IEP) Goals - Somali translation)


Nidaamka waxbarashada gaar-ahaneed wa mid macquul ah. Sanad walba, kooxda waxbarashada gaar-ahaneed oo ay waalidku ka mid yihiin waxey ababulayan qorsho waxbarasho oo ilmaha u qalma iyaga qaas u ah. Halka ay ilmahu waxbarashada waqtiga xaadirka ah ka marayan aya asal u ah baahida cadadeeda. Kooxdu waxey ababuleysa goolal in la gaaro tahay si qanciyo baahida.¹



Si foorjigan aan u eegno goolalkan qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed. Qorshahu wa inuu wax ka qabta dhamaan baahida waxbarasho ee ka dhashay naafanimada ilmahaaga, iyadoon lo tixraaceyn astaanta naafanimada. Baahidan qaar ka mid ah waxa wax looga qabanaya goolasha qorshaha waxbarasho ee garr-ahaneed.²

Ayadoo la raacayo waaxda waxbarashada ee Mareykanka, qorshaha Tacliinta Shakhsiga ah waa inuu kujiraa yoolalka sanadlaha ah ee loogu talagalay in lagu wanaajiyo natiijoyinka waxbarashada iyo waxqabadka shaqeynaya ee cunug kasta oo naafa ah. Tani dabcan waxa ka mid ah fursad macno leh, oo cunugga loogu talagalay in uu ka soo baxo himilooyinka adag. Ilmo kasta oo naafa ah waa in la siiyaa qorshe waxbarasho oo khaas ah oo loogu talagalay in lagu bixiyo marin u-helka istaraatiijiyada wax lagu baro, iyo manhajka ku habboon labada caqabadood ee heerarka waxbarashada gobolka iyo yoolalka higsashada, kuna saleysan duruufaha gaarka ah ee ilmaha.³

- Qorshaha waxbarashadda shaqsiyadeed waxa ka mid noqon doona yoolalka waxbarasho ee tilmaamaya waxa canuggaaga laga **rajeynayo inuu ku guuleysto hal sano** oo ah qorshihii waxbarasho ee shaqsiya ahaa markii lasiiyay tilmaam waxbarasho gaar ah iyo adeegyo laxiriira.
- **Yoolalka ayaa laga yaabaa inay daboolaan mid kastoo ka mid ah:** waxbarasho, dhaqan, shaqo, bulsho, ama xirfado kale oo muhiim u ah cunuggaaga inuu barto
- Kooxda Qorsheynta Wax-barashada Shakhsiyeed ayaa ka wada hadli doona:



¹ Meel laga Bilaabo: Fahmitaanka heerarka hada ee horumarka aqooneed iyo cadeynta waxqabadka, [PACER.org/parent/php/PHP-c186so.pdf](https://www.pacer.org/parent/php/PHP-c186so.pdf)

² Baahida inteeda kale aya looga hadli kara iyado la isticmaalayo waafajin, hab-doorin ama adeegyada la xiriira, ama tiknolojiyadda caawinta. Booqo [PACER.org/parent/resources/understanding-the-spec-ed-process.asp](https://www.pacer.org/parent/resources/understanding-the-spec-ed-process.asp)

³ Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka "Suaalaha iyo jawaabaha Supreme Court Case Decision Endrew F. v. Douglas County School District Re-1," December 7, 2017

- Gool walba waxu lahaan dona ugu yaran labo ujeedo oo muddo gaaban lagu gaarayo Calaamado-hosaad
 - Ujeedooyinku waa tilaabooyin horseedaya dhameystirka himilada
 - Calaamado-hosaadku wa astaamo muujinaya horumarka xirfadaha ama dhaqanka
- Yoolalka iyo ujeeddooyinku waa inay ahaadaan kuwo la qiyaasi karo si kooxda waxbarashada gaar-ahaneed ay u ogaadaan haddii ilmahaagu uu horumar ka samaynayo mid kasta⁴
 - Yoolalka waa inay kujiraan bilow fasiix ah ama heer aasaasi ah iyo heer dhamaadka la filayo (heerkan waxaa laga heli karaa yoolka ama bayaanka heerarka hada)
 - Hadafka ama ujeeddooyinka ayaa qeexi doona sida horumarka loo cabiro
- Haddii barnaamijka waxbarashada shaqsiya ah (IEP) ee ilmahaagu ka kooban yahay ugu yaraan hal bartilmaameed oo ka hadlaya heerka heerarka waxbarasho ee⁵ ee akhriska iyo / ama xisaabta, waxay la kulmi doontaa shuruudaha ku saleysan heerarka waxbarashada shaqsiya ah “standard-based IEP”

Aynu eegno tusaale:

Heerarka hada la joogo ee qoraalka waxqabadka ayaa sheegaya in wiilkaagu uu qoro sadarado aan isku habeyneysay oo 50 boqolkiiba waqtiga higgada qalad ah iyo xarakaynta. Wiilkaagu wuxuu lahaa yool qoraal ah IEP-kisii ugu dambeeyay oo uu ku gaaro hal sano.

Mowqifku waa in la kordhiyo heerkiisa soo saarida sadarado abaabulan oo leh higgada sax ah iyo xarakaynta 90 boqolkiiba waqtiga hal sano gudaheed ah oo leh hagida waxbarashada gaarka ah ee ku habboon.

Hal **ujeedo** ayaa daboolaya isku-habeeynta baaragaraafka.

- Xirfadaha la qabanayo: Qor jumlad ka kooban sideed-sadar
- Shuruudaha Qiimeynta: Marka macallinka maaddo siiyo
- Shuruudaha qiimeynta: Ku dar jumlad mowduuc iyo ugu yaraan saddex faahfaahinta taageera
- Qaabsocodka qiimeynta: Shaqo ilaa 90 boqolkiiba sax ah, sida bil walba lagu cabiray tusalooyinka qoraalka

Ujeeddada labaad waxay ka hadlaysaa hinggada iyo xarakaynta.

- Xirfadaha la qabanayo: Markaad qoreyso sadar
- Shuruudaha qiimeynta: Ku dar hinggadinta saxda ah iyo xarakaynta
- Qaabsocodka qiimeynta: Shaqo ill’aa 90 boqolkiiba sax ah, sida lagu cabiray tusalooyinka qoraalka

Horumarka yoolka iyo ujeeddooyinka waxaa lagu qiyaasi doonaa shaqada maalinlaha ah, kormeerka macallimiinta, iyo tusalooyinka baaragaraafka bill walba ah. Horumarka waxaa lagu wergelinaya shan jeer sanadkii, inta badan sida ardayda dhigata waxbarashada guud, oo leh afar warbixin qoral ah iyo hal shir IEP. Warbixinta horukaca ee ugu horaysay, wuxuu gaadhay 65% abaabul sadaradiisa ah 70% saxsanaanta hingaada iyo 65% xarakaynta. Heerka horumarkaan, waxay u egtahay in wiilkaagu ku gaari doono yoolka hal sano gudahooda.

Gunaanadka, yoolalka IEP waa in loo qoraa si ilmahaagu u “lug yeesho oo u yeesho horumar guud ahaan manhajka waxbarashada” iyo inuu “ku habboon yahay hami ku habboon marka loo eego duruufaha ilmaha.”⁶

⁴ Barnaamijka waxbarashada qaas-ahaneed (IEP) Warbixinta Horumarka ee Barnaamijka: Sidee ayaad ku ogaan karta haddii ilmahaagu ku horumarinayo ujeedooyinka IEP?, [PACER.org/parent/php/php-c255.pdf](https://pacer.org/parent/php/php-c255.pdf)

⁵ Ereygan macnihiisu waa heerka laga filayo heerka waxbarashada heerka fasalka ee dhammaan ardayda. Heerarka Tacliineed ee Minnesota K-12 waa qoraallo uu gobolku qaatay oo qeexaya waxa ardayda dhan ee fasal gaar ah laga filayo inay ogaadaan oo ay awoodaan inay yeeshaan dhamaadka fasalkaas. Heerarka Minnesota waxaa loo dejiyey luqadda Ingiriisiga, xisaabta, sayniska, cilmiga bulshada, farshaxanka, iyo jimicsiga jirka.

⁶ Waaxda Waxbarashada Mareykanka, “Su’aalaha iyo jawaabahooda ee ku saabsan Go’aanka Maxkamadda Sare ee Mareykanka Andrew F. v. Douglas County School District Re-1,” Diseembar 7, 2017.